volume 1 - Issue 5 - November 2007

Dedicated
to peace
and democracy.

# PDRC Newsletter

A Periodical Publication by Puntland Development Research Center

**PDRC : Laying the groundwork for tomorrow's communities**

## What's inside?

From director's desk
page 2

Baahinta awoodda xukunka dawladda Puntland
page 2

The prevention of resource based conflicts
page 3

A lesson on peace: PDRC/Interpeace approach to peace and recon-ciliation initiatives in Puntland
back page

the success story

## Heshiiska Burtinle waa guul nabadeed

***Heshiiska taarii-khiga ah ee loogu magac daray "Hesh-iiskii Burtinle", waxa uu ka mid yahay heshiisyada nabad-eynta beel-aha Soo-mali-yeed kuwa ugu muhiim-san. Waxa uu salka ku hayaa muran colaad ka dhalatey degaan ay wada degaan labo beel-ood oo reer Punt-land ah, gaar ah-aan tuulada Cadaadda oo 42 km Waq-ooyi kaga u jirta degmada Buu-rtinle.***

***Colaaddan oo mu-ddo socotey waxa ay keentay khasaa-re naf iyo maalba leh. Inkasta oo dadaal badan loo galay si loo xakeemeeyo, haddana ma suurto galin. Isku daygii ugu dambeeyey, isla markaana ahaa mid lagu guuleysto waxa lagu hindisay magaaladda Garowe.***



Garaad Jama Garaad Cali Islaan Bashir Islaan Abdulle

Xaruntа Horumarinta Cilmibaarista Puntland waa hay'ad maxalli ah, kuna hawlan arrimaha nabadeynta iyo dib-u-heshiisiinta beelaha Puntland. XHCP kaalin weyn ayey ka qaadatey heshiiskaan, iyada oo martigalisay shirkii ugu horreeyey ee gogol-xaarka ahaa, laguna qabtay hall-ka shirarka ee hay'adda.

Shirka muhiimadda ballaaran leh ee lagu dhex-dhexaadinayey labada beelood ee colaaddu ka dhex-taagneyd waxa lagu qabtey degmada Burtinle, waxaana ka soo qayb-galey Isimo, maamulka Puntland, xubno ka socday beelihii is-hayay, haween iyo hay'adda PDRC. Shirkaan oo qaatay mudo 9 casho ah waa la isku af-gartay. Go'aamadii ka soo baxay waxaa ugu waaweynaa:

**1. In raggii dhintay oo ahaa 8 oo hal dhinac ah laga bixiyo geel dhan 120 halaad, 5,000,000 shillin oo duug ah iyo gabar-godobtir ah.**

**2. In barkadihii ku yaalay degaanka la isku hayay la dumiyo marka laga reebo 2 barkadood oo ay leeyihiin beesha Bah-harasame.**

Go'aamadaan aad loo quudaraynayay inay fulaan ayaa midkii ugu horeeyay uguna qalafsanaa loo howl-galay bishii may ee sanadka 2007, kuna saabsanaa burburinta barkadaha beesha cumar mahamud waana lagu guulaystay.

Intaa dabadeed, laba shir oo lagu kala qaadanayey mag dhan 1,070 halaad ayaa lagu qabtey degaanka Xoorre oo 30 Km u jira degmada Burtinle. Shirka hore waxa beesha Bah-hararsame lagu wareejiyey mag dhan 470 halaad oo dhogor ah. Shirka labaadna waxa lagu wareejiyey 600 halaad qiimahood oo lacagta doolarka ah.

Hay'ada PDRC oo markastaba taageero agab iyo mid farsamo la dhinac taagnayd shirka waxa ay kharash hagar la'aan ka gaysatey dhammaan kulamadii lagu heshiisiinayey labada beelood, iyada oo dhinaca kalena diiwaan-gelin taariikhi ah ka sameyneysay guud ahaan heerarka ay mareysey heshiisiintu.

Mukhtar H. Mohamed, PDRC

PDRC nonprofit organization



Abdurahman Shuke
PDRC Executive Director

From Director's desk

## *Regional Conflicts: The Las Anood Case:*

*October 15 marks for those who remember the Somalia historical events a sad, unforgettable day. It is the day President Abdirashid Ali Sharmarke was assassinated by a policeman at Las Anood in 1969. Paradoxically, it is the day the Somaliland forces occupied Las Anood. The two events, though separated by several decades, form a historical episode for the town of Las Anood.*

*The Somaliland forces' occupation of Las Anood had further escalated the political and military tensions between the two contending administrations (SL & PL).*

*On November 20-23, the traditional leaders and sub-clan elders of the Sool, Ayn and South Sanaag regions held an emergency meeting at Boame town (KM 68 south west Garowe) to discuss and assess the deteriorating political and security situation of the region and to agree upon an agenda, which included among other issues, the unity of the concerned sub- clans and rejection of secession of Sool, Sanaag and Ayn regions from the Somali Republic.*

*These statements of the traditional elders send clear messages to the parties involved in the conflict, and if the political differences are not solved by peaceful means, the consequences will cause unprecedented human suffering and economic and social destruction.*

*The current military build up around the town of Las Anood and neighbouring areas is symptomatic to the seriousness of the situation.*

*PDRC appeals to both sides to refrain from escalating the military violence in which many innocent lives may perish, and to workout a peaceful solution to the conflict.*

**Editors**
Muctar H. Mohamed
Amina A. Nur
Mohamed Ismail
**Copy Editor**
Ali Farah
**Design and Production**
Punt Publishers

# Baahinta awoodda xukunka dawladda Puntland

**Hordhac**

***Sida xaqiiqada ah way adag tahay in si dhakhso ah ay uga hirgasho siyaasadda Maamul baahintu, ama Xukunka awood qeybsigu gobollada ama dalalka ku soo dhaqmi jiray awood qeybsiga Xukunku uu meel ku wada aruursan yahay. Mushkiladaha lagala kulmo waxa ka mid ah siyaabaha loo dardargelin karayo hanaanka geedi socodka siyaasadda Baahinta Maamulka iyo sida loo samaynayo la xisaabtan dhab ah. Waxa kale oo carqaladdo lagala kulmaa siyaabaha wax laysugu duba-ridayo iyo sida loo hagaajinayo wada shaqeynta hay'adaha hawluhu ka wada dhexeeyaan.***

Si uu ka hortag uga yeesho arrimahaas, Maamul gobolleedka Puntland waxa uu dastuurka ku meel gaarka ah (qodobkiisa 83) ku qeexay hirgelinta barnaamijkiisa siyaasadda Maamul Baahinta iyo gudbinta adeegyada Bulshada la xiriira. Sidoo kale waxa lagu bayaamiyey Xeerka Wasaaradda Dawladda Hoose ee soo baxay 2003 dii kaas oo awood u siinayey degmooyinka ku dhaqanka maamulka awood qeybsiga xukunka oo ku dhisnaan doona dakhli abuuris , kharaj bixin iyo la xisaabtan dhab ah. Hase ahaatee hanaanka siyaasadeed ee geedi socodka Baahinta Maamulka waxa saameyn ku yeesha heerka bulshada aqoonteedu gaarsan tahay, wacyiga iyo biseylkooda siyaasadeed

Sidaas darted Maamul gobolleedka Puntland waxa uu garwaaqsaday dardargelinta geeddi socdka Maamul baahintu in aanu hirgeleyn haddii aan la kobcin tayada aqoonta iyo xirfadaha mmaamul iyo gudbinta adeegyada Bulshada. Arrimahaas oo la hirgeliyo ayaa loogu gudbikaraa laguna higsan karaa Maamul wanaag iyo horumar laga gaaro dhinaca siyaasadda..

Hay'adaha bah wadaagta ah ee PDRC iyo Interpeace ayaa Maamul goboleedka ka siiyey taageero laxaad leh sidii loo hormarin lahaa laguna gaari lahaa hanaanka geeddi socdka siyaasadda baahinta maamulka. Halkaas oo PDRC ay u diyaarisay barnaamij teyeysan oo lagu kobcinayo Aqoonta Golayaasha Degmooyinka, oo u horseeda in la helo Maareyn nuxur leh iyo hirgelin Siyaasadeed oo horumar leh.

Waxa Intaas dheer Xarunta PDRC waxa ay qaban qaabisey aqoon- isweydaarsiyo iyo wada tashiyo lagu lafa gurayey sidii loo xoojin lahaa hanaanka geeddi socdka Siyaasadeed si dadaalka Maamul goballeedku ugu jiro Maamul Baahinta uu uga miro dhallin lahaa.

Si Hadaba barnaamijkaas ku saabsan Kobcinta aqoonta Golayaasha degmoyinku aanu u tasoobin hay'adda PDRC waxa ay sameysmay guddi ay ku magacawday Koox Hawlleedka Barnaamijka Baahinta maamulka oo hawl-qabadkoodu yahay sidatan:

- In ay soo bandhigaan mashaakillada jira ee hakinaya hawl-socodsiinta barnaamijka
- Ka doodaan arrimaha xilliyada shirarka ay isugu yimaadan
- Dejiyaan qorshe Hawlleedka lagu hirgelinayo barnaamijka
- Soo jeediyaan kana tala bixiyaan habsami u socodka barnaamijka
- Ansixiyaan nidaamka socodsiinta iyo hawl-gellada barnaamijka

Guddiga la rabo in ay qabtaan hawlaha noocas ah waa in ay yihiin;

- Kuwo xushmad iyo qadarin ku leh bulshada dhexdeeda
- Kuwo mutadawacnimo ugu soo ban-baxay hirgelinta barnaamijkan
- Waaya-aragnimo leh xag dhaqan, mihnadeed iyo mid Siyaasadeed
- Dhexgal wacan ku leh bulshadiisa , ujeeddo gaar ah na aan hanbaarsaneyn



Koox hawleedka barnaamijka maamul baahinta

Eeg bogga 3aad

interpeace

## Mission

*The International Peace-building Alliance (Interpeace) is dedicated to building lasting peace by reinforcing the capacities of societies to over-come deep divisions and to address conflict in non-violent ways.*

*We are rooted in local realities, drawing strength from an alliance of national teams with a long-term commitment to building peace in their own societies.*

*We believe in the wisdom of listening, the power of participation and the strength of informed dialogue to build understanding and trust - the foundations of peacebuilding.*

*Values and Working Principles*

*These are the values that Interpeace is always ready to defend and promote.*

- *Peace is about resolving conflict without violence*
- *Respect for local culture and belief in the power of local capacities, ideas and solutions*
- *Trust between people is a critical foundation for lasting peace*
- *Integrity in ensuring that we are principled, forthright and sincere*
- *Participation is key as active interaction transforms relationships*

Interpeace and PDRC are partner

# The prevention of resource based conflicts

An awareness raising consultation meeting for Puntland pastoralists and farmers was held at PDRC Conference Hall on October 24th-25th , 2007. The non-state actors Working Group and focal members of the farming and pastoral communities took part in the two-day consultation meeting which focused on the resource based conflict such as water, pasture and farming. This consultation meeting was the third workshop on land dispute and resource based conflicts organized by the NSA team this year.

Two other consultative workshops on land dispute were held on July and August in Garowe and Galkayo respectively, where the local authorities, land dealers, non-state-actors, police officers and local courts participated and debated the issues thoroughly.

In order to comprehend fully the complexity and the scope of the matter and come up with adequate recommendations, the NSA team along with AVU undertook further research and data collection. In doing so, on October 1st-2nd 2007 the NSA team had visited Cuun village which is a vibrant farming community located 60 km north-east of Garowe as well as the important villages Cade-dheero, Qalqalooc and Shimbiraaley which are both important water spots.

*The nomads and the farmers whose lives depend primarily on animal herding and farming respectively are the two opposing competitors.*



camels grazing close to farming land

All these places are the potential flash points of conflict for water, pasture and farming.

The conflict over scarcity of resources such as water, pasture and farming areas is rapidly increasing in Puntland and it is a good indication of what may lie ahead unless a skillful solution is found.

Mr. Mohamad Hassan Barre [an independent researcher] gave the consultation a broad prespective on land related issues. He cited all the laws and regulations regarding this matter dated from the colonial era up to the collapse of the Somali government in 1991. In his address to the workshop he urged everyone involved to be more broad minded on the matter and think deeply how to avoid conflicts over land and find means and

**Abdi Farah (Juha), PDRC**

# Baahinta awoodda xukunka ...

ka yimi bogga 2aad

Intaas ka dib PDRC waxa ay bishii Luulyo 2007 kulan siisay Koox Hawlleedka barnaamijkan Maamul Baahinta si ay uga tala bixiyaan hab socodkiisa ,qorshana u soo dejiyaan kaas oo lagu dabaqay lana waafajiyey qorshe hawlleedkii hay'adda PDRC u dejisay Barnaamijka Maamul Baahinta.

Hadaba PDRC iyada oo tixgelin siinaysa hawl-galladaas hore, ayey Koox Hawlleedka u qaban-qaabisay shir wada tashi oo ku saabsan dar-dargelinta iyo horumarinta barnaamijka Maamul Baahinta Golayaasha Degmooyinka, oo socday muddo laba berri aheyd (7dii-8dii bisha Noofembare), ayna ku falanqey-nayeen sidii loo xoojin lahaa loona horumarin lahaa qaabkooda shaqo dhisme iyo waxyaalaha hor-taagan in ay si habsami leh u fuliyaan adeegyada bulshada iyo sidii loo tayeyn lahaa kartidooda aqooneed si Golayaasha degmooyinku ay u hantaan siyaasadda Maamul Baahinta.

Mudadaas labada berri aheyd waxa ay ka wada doodayeen qodobadan

- siyaabaha loo xoojin karo loona dar-dargelinkaro waxqabadka Golayaasha degmooyinka iyo Dawladaha hoose
- Qiimeeyn lagu sameeyo waxqabadka iyo waxtarka ay soo kordhiyeen Golayaasha degmooyinku intii ay sameysnaayeen
- aragtida ay bulshadu ka qabto iyo waxa ay ka filayeen

Markii ay dhameysteen doodahoodii ayaa waxa ay ku tala bixiyeen;

- In guddiga joogtada ahi ay noqdan kuwo aqoon u leh hawl-fulintooda sida uu qeexayo Qodobka 7aad ee xeer Hoosaadka Wasaaradda Dawladaha hoose iyo horumarintu
- Iyada oo la cuskinayo Qodobka 7aad ee xeer Hoosaadka maamulku waa in uu dib u habeeyaa Golayaasha degmooyinka hadda jira.
- Tababarrada waa in loo fidiyaa xubnaha kale ee ka mid ah Golayaasha degmooyinka
- Tababarada ay bixineyso PDRC, si waxtarkoodu u gaaro bulshada; wax-qabadka hay'adduna ugu muuqato dadweynaha
- Golayaasha degmooyinku waa in ay yeeshaan jaan-gooyo ay ku fuliyaan hawllahooda

**Mohamed Ismail, PDRC**

**Somali Proverb** Nabad baa caano macaan (Peace tastes like sweet milk.)

# A lesson on peace: PDRC approach to peace and reconciliation initiatives in Puntland

**The International Peacebuilding Alliance (Interpeace) and its Somali partners-PDRC in Puntland, APD in Somaliland, and CRD in South Central Somalia-are taking peacebuilding in the Somali region in a new and promising direction. The outcome of the Peace-Mapping project, or Astaynta Nabadda, will have huge implications not only for the Somali stakeholders and international community but also it provides peacebuilding alternatives for countries that are well on the way to securing peace.**



Interpeace and Somali partners-PDRC, APD, and CRD-in the first Peace-Mapping workshop.

The primary objective of the Peace-Mapping project is to understand the factors that contribute to the success or failure of peace and reconciliation initiatives that has taken place in the Somali region during the last seventeen years, or the post collapse of central government period. Through the compilation of peace and reconciliation initiatives in the Puntland region and the conducting of in depth analysis of two case studies, learned lessons will be generated. By generating "learned lessons", for once, history may not be repeated. More importantly, identifying the role of participants, i.e. the government, elders, civil society, international community, etc., will help circumvent conflict and participant competition. Future organizers of peace and reconciliation initiatives can refer to the lessons from the Peace-Mapping project and avoid factors which can lead to the failure of the initiative or conference.

Using Participatory Action Research (PAR) as the research methodology, the Peace-Mapping team has selected two case studies: the Garowe Community Constitutional Conference (GCCC) in which the Puntland Regional Administration was established and the Burtinle Peace Agreement (BPA), the recent clan conflict between two Harti sub-clan-Baharsame and Omar Mohamoud. Hassan Aden, a Senior Researcher, and Youth and National Reconciliation focal point, is taking lead in the GCCC case study analysis while Amina Nur, lead Gender Researcher, will be focusing on the BPA. In each case, important figures have been consulted. These figures contributed to the generation of significant learned lessons. These figures include Sutlan Saeed Mohamed Garase; Mohamed Abshir Waldo, a well-informed Somali intellectual; Aisha Gelle, Minister of Women Development and Family Affairs; Abdi Saeed Ali (Suuryaan), an Elder; Daahir Mohamed Farah (Sanwaylood), an Elder; and Mayor of Las Anood, Abdulrahman Aden Jama. The project is in its final phase. In early December, a Peace-Mapping Research Validation Working Group meeting will be held to conclude the Peace-Mapping project. The Working Group will validate the research and have the opportunity to challenge PDRC's research analysis. Working Group members' input will enhance the overall product. Dissemination of the research findings will be the final step. Without a doubt, the Peace-Mapping project holds great prospect for the future of Puntland peace processes.



Working Group members generating a list of significant peace and reconciliation initiatives in Puntland

Amina A. Nur, PDRC

PDRC
Puntland Development Research Center
Garowe, Puntland (Somalia)
Phone:(+2525) 844480
Thuraya: 88216 4333 8170
www.pdrcsomalia.com

interpeace
Interpeace Regional Office for Eastern and Central Africa
P.O.Box 28832
Nairobi, Kenya
T. +254 (20) 375 4166 / 375 4167
F. +254 (20) 375 4165
eca@interpeace.org

Designed and produced by Punt Publishers, Tel: 2525740167, E-mail puntpublishers@gmail.com..Waxaa lagu daabacay madbacadda East Africa, Bosaso, Puntland. Tel 796253